# Tamarta iyo Ilayska



*Sawirka koowaad: Tamar iyo ilays. Xigasho: Pixapay.com*

Ilaysku wuxu tamar siiyaa habka ay geeduhu cuntadooda u samaystaan, Muhiim ayaanu u yahay oo sida ay ugu baahan yihiin hawada ito biyaha ayey dhirtu ilayska ugu baahantahay. Ilaysku waa hal qaab oo tamar ah. Ereyga ”tamar” waxaa si aad ah loogu dhex isticmaalaa Sayniska. Waa maxay macnaha ereyga tamar?
Duni Sayniseedka gudaheeda, tamari waxa ay la xiriirtaa awooda ama kartida hawl lagu qabto. Taas macnaheedu waxa uu yahay in ay tamari tahay waxa u suurageliya makiinado fara badan iyo jirkeennaba in a ay hawl qabatan.

Qaar ka mid ah xaqiiqooyinka aasaaska u ah tamartu waa, iyada oo aan
culays lahayn lana arki karin,lana kaydin karo iyo iyada oo laga beddeli karo
Hal qaab loona beddelo qabb kale. Tusaale, muruqyadaadu waxay leeyihiin

Tamar ay hawl ku qabtaan ama ay alaabo kaga dhaqaajiyann meel una dhaqaajiyann meel kale. Haddaba halakan, tamarta ku dhex kaydsan muruqyadaada waxa loo beddelay qaab kale oo tamar ah oo ah tamar socod, taas oo la xiriirta tamarta socodka.

Waxa keliya ee lagu ogaan karo tamarta, marka laga beddelya hal qaab loona beddelayo qaab kale. Taas macnaheedu wuxuu yahay in tamarta muruqyadaada gudahooda lagu ogaan karo oo keliya marka ay soo saarto socod. Waxa jira qaabab kala duwan oo tamar ah. Qaar ka mid ah qaababka ay tamartu u jiri karto Waxa ka mid ah tamartu u jiri karto waxa ka mid ah tamarta socodka, tamarta Ilayska, tamarta kulka, tamarta jabaqda, tamarta korontada, tamarta kimikeed, tamarta dabaysha,tamar muruqeedka iya qaar ka sii badan.

## Ilaha kala duwan ee tamarta

### Tamarta ilayska:

Waa maxay ilaha tamarta ee ilaysku?
Ilaysku wuxuu inoo suurageliya si annu wax u aragno. Haddi aanu ilays Jirin, waxaynu ku jiri lahayn wada madow. Indhaheenu waxa keliya ee ay ku shaqeeyan marka ilayska gargaarsadaan. Immisa nooc oo ilays kala duwan ah ayya aynnu arki karnaa?

Ma ilyaska cad oo keilya ayya aanu wax ku arki karnaa, mise sidaa si la mid ah aynnu wax ku arki karnaa ka cas. Cagaaran iya ka hurdiga ah?

### Sidee ayaa uu u socdaalaa ilaysku?

Ilaysku wuxuu ku socdaalaa xarriiqyo toosan. Walax kasta oo isku gudubta Jidkiisu ilaysku waxa uu ka sameeyaa hoos. Hooska lagu dul arko oogada Dhulka waxa la oran karaa inuu yahay hummaagga walxaha isku gudba jidka

Ilyaska. Hoosasku waa meelaha aannuu ka jirin iftiin ilays. Haddii aannu ilaysku Ku socdaalin xarriiqyo toosan wax hoos ahi ma jireen.

## Ilaha muhiimka ah ee tamarta ilayska

Tamarta waxa laga dhex helaa waxyaabo fara badan. Waxa laga yaabaa in aad isweydiiso meesha ay dhammaan tamartani ka timid. Ma meel ayaa Tamarta mar kasta laga helaa? Weligeed miyaa aanay dhamman? Mise waynnu wada isticmaalnaa muddo ka dib?

Sidee ayaa aynnu u xaqiijin karnaa si aynnu u haysanno tamar innoogu filan baahideenna mustaqbalka?  Waxa aynu dib ugu raadraaci karnaa isha tamarta innta bada nee aynnu isticmaalno cadceedda.
Waxa aad ku aragtaa jaantuska sare in ay cadceeddu saamayso carradeena, iska markaana ay sabato cimilo-gooreedkeenna, wanna isha cuntadeena iyo shidaalkeena. Sidee ayaa ay u ekaan lahayd cimilo-gorreedkeennu haddii aanay jirin qorraxi? Ma jiri lahaayeen dabaylo, roob xoog-koronto-biyood iyo webiyo?
Qorrax la'aan. ma  bixi lahyd dhir  cagaarani? Maxay u noolaan waayeen? Ma noolaan lahaa qof?. Ma jiri lahaayeen dhuxul  iyo  betrool dhirta Cagaaran la'aantood? Maxay u jiri waayeen? Waxa aynnu soo sheegnay in ay Carradu ka samaysan tahay  dhagxaan u kala burburtay  quruurux yar-yar. Waa kuwee wakiillada kala burburiya dhagaxaanta?  Kee ayaa wakiilladan tamarka hela codceedda

### Adeegsiga tamarta cadceedda



*Sawirka 2aad. Tamarta cadceeda. Xigasho:Pixapay.com*

Muddo dheer ayaa adamigu si toos ah u ilayska qorraxda ugu isticmaalayey qallajinta waxyaabaha la cuno sida midhaha, hilibka iyo kalluunka si loo kaydsan karo.

## Korontada Ilayska qorraxda.

Waxa uu dhulku tamar dheeraad ah ka helaa cadceedda si aynu ugu daboollo dhammaan baahiyaheena tamareed. Haddii aynu qaban lahayn una isticmaali lahayn tamartansi aad u habboon, uma aynu baahaneen in aynnu gubno shidaalada kala duwan.
Weli ma aragtay meelo tamarta qorraxda lagu isticmaalo?

Tamarta qorraxdu waxa lagu isticmaalaa ujeedooyin xagga xagga guryaheenna ah sida kululayntabiyaha, cunto karinta iyo iftiiminta. Guud ahaan oogooyin qorraxeed ayaa la dul dhigaa saqafyada guryaha si ay ay u qabtaan tamarta qorraxda. Oogooyinka qorraxdu waxay u badallaan tamarta cadceedda (ilays) tamar koronteed iyo mid kuleed.Quwadda laga dhaliyo qorraxda way ka faaiida badan tahay midda laga dhaliyo shidaalka batroolka iyo dhuxusha adag (coal), waayo uma baahna dayac tir joogta ah, mana laha kharaj joogta ah sida batroolka. Har iyo habeenba wuu kuu shidnaankaraa markii muraayaduhu kala jiraan. Sida ilayska dhabooyinka. Wuxuu u fiican yahay dabiicadda iyo dadka. Maadaama aanu lahayn dhibaatooyinka batroolka iyo dhuxusha adagi u geystaan dadka iyo dabiiadda (pollution) IWM.

## Adeegsiga tamarta cadceedda (ilayska cadceedda).

Muddo dheer ayuu aadamigu si toos ah qorraxda ugu isticmaalayey qallajinta waxyaabaha la cuno sida miraha, khudradda cagaaran, xabuubka iyo kalluunka si loo kaydsan karo.

### Waxqabad

Ku samee waxqabadkan bannaanka dugsiga dhexdiisa ama meel kaleba.

Soo qaado bikaac tuur leh amo muraayad weyneyso ah sida muraayadda gacanta si aad fallaaraha cadceedda ugu dul kulmiso gobol xaashi ah sida ku muujisan jaantuska dhexdiisa.

Maxaa dhacya muddo ka dib?

Xaggee ayaa ay ka tamarta gubaysa warqaddu?

Tamarta cadceeddu waxay inoo caawisaa siyaabahan soo socda:

- Si aynnau u beeranno miraha iyo khudaarta.
- Si aynnau uga helno diirrimaad.
- Si aynnau uga kululaysanno biyaheenna.
- Si aynnau ugu qallajisanno dhareenna iyo cuntooyinkeenna.

Si aynnau ugu ummi-bixinno biyaha ku dhex  jira meertada biyaha,kuwaas oo agu dambeysta roob ina siiya.

Korontada ilayska cadceedd

Waxa uu dhulka tamar dheeraad ah ka helaa cadceedd (tamarta cadceedda) si aynnu ugu daboolno dhammaan baahiyaheenna tamareed. Haddii aynnu dabi lahayn una isticmaali lahayn tamartan si aad u habboon, uma aynnu baahanneen in aynnu gubno shidaallada kala duwan.

Weli ma aragtay meelo tamarta cadceedd lagu isticmaalaya?

Miyey tamarta cadceedd ama awoodda cadceedd inna siisaa kul, ilays iyo wax la mid ah?

Tamarta cadceedda waxa lagu istimaalaa ujeedooyin xagga guryaheenna ah sida kululaynta biyaha, cunto karinta iyo iftiiminta. Guud ahaan, oogooyin cadceedd ayaa la dul dhigaa saqafyadaa guryaha si ay u dabaan tamarta cadceedda cadceedda. Oogooyinka cadceeddu waxay u beddelaan tamarta cadceedda (ilayska) tamar koronteed iyo mid kulleed.

## Dhagxaanta ku shaqaysa cadceedda

Dhagxaanta ku shaqaysa cadceedda waxa ay isticmaashaaa tamarta ilayska si ay u soo saarto xaddi yar oo koronto ah. Tani waxay ku filan tahay in ay kaga shaqaysiiso qalabka wax lagu xisaabiyo sidaa awgeed ayaan batariyo loogu baahan. Dhagxaanta sida oo kale ah ayaa la yiraahddaa dhagxaan cadceedeed waxaana loo adeegsadaa soo saarista korontada ee dayax-gacmeedyada hawada sare dhexdeeda. Tamarta waxa lagu dhex kaydin karaa batariyo la adeegsado marka aanu jirin ilays qorraxeed.

## Tamar kimikeed



*Sawirka 3aad: Tamar kiimikaad. Xigasho:Pixaybay.com*

Walax kimikeed oo kasta leh tamar waxtar leh ayaa la yiraahdaa shidaal.Cuntooyinka kala duwan sida kaarbohayda, dufanka iyo saliidaha waxa lagu tilmaamaa shidaal-jidheedkeenna. Saliindda dufanka xoolaha iyo ta nibirrraiga badda waxa ilaa boqol sano ka hor lagu isticmaali jiray faynuusyada la shito. Dalkeenna gudihiisana, qoryaha iyo dhuxusha ayaa ah shidaallada caadi ahaan wax lagu karsado lana kulaalo.

Dhagax dhuleedku waa macdan madaw oo gubata waxaana il tamareed ahaan loogu isticmaalaa warshadaha waaweyn. Maantase shidaalka ugu isticmaalka badanuguna muhiimsani waa batroolka kaas oo laga soo sifeeyo saliidda qayriin. Saliidda qoyani waa dareere madaw oo laga soo saaro dhulka hoostiisa, taas oo kumaankun sanno in ka badan ka samaysantay dhirta yar yar ee badweynta iyo maatarka dhirta baxaysa.
Tamarta batroolku waxa ay inoo suuragalisaa in aynu ku qabsanno shaqooyin fra badan oo waxtar leh.

Ma u malaynaysaa in ay khayraadka dhagax dhuxuleedka iyo batroolka aynnu maanta haysannaa si dhaqso ah loo dhammaynayo? Ma  noqon doontaa suuragal in iltamareedkan lagu bedelo mid kale haddii uu dunida ka dhamaado.
Ma ogtahay in xaabada iyodhuxusha loo gubayo si ka sii dhakhso badan sidii dhir cusubi u soo bixi lahayd? Maxaa aynu ka qaban karraa sidii loo yarayn lahaa xaddiga xaabada iyo dhuxusha loo isticmaalayo shidaal ahaan? Waa maxay isha tamarta ee aynu  iyada ku badali karraa? Waxa aynu ognahay in xaabada dabku ay tahay il tamareedqiimo leh oo qaab kiimikeed ah. Ma arki karno tamarta ku dhex jirta xaabada, ilaa la gubo si ay u bixiso ilays iyo tamar kuleed. Waxa tamarta kiimikeedee ku dhex keydsanxaabada loo beddelaa kul iyo ilays marka la gubo. Marka dhagax koronteedka loo isticmaalo si uu u ifiyo laambad waxa waxa tamarta kiimikada loo badalaatamar koronteed.Tamar koronteedkana waxa loo sii badalaa tamar ilays iyo mid kuleed.

## Tamar Jabaqeed

Mar ka aalad muusik la tumo, tamarta socdaalka ayaa loo badalaa tamar jabaqeed. Marka ay walxo gariiraan, waxa ay soo saaraan tamar jabaqeed. Dhegehaaga waxa ay awoodaan in ay dareemaan gariiridaasi. Marka tilifoon la isticmaalo waxauu ku shaqeeyaakoranto iyo birlabo. Marka aad ku hadlayso taleefanka tamar jabaqeed ayaa loo badalaa tamar koronteed taas oo fogaan aad u dheer dhex socota xarkaha taleefonada.amar koronteedkan ayaa waxa loo sii badalaa taleefonada tamar socod, tamarta socodkana waxa loo sii badalaa taleefonada tamar socod, tamarta socodkana waxa loo sii badalaa tamar jabaqeed.